**XUKUUMADDA SOOMAALIYA**

**Xeerka Maamulka 15 Maarso 1957, lamba. 62 rep**

**Guddiga loo xilsaaray in ay ka soo shaqeeyaan Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliya.**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay Xeerka 27 Disembar lamba.19 ee Xukuumadda Soomaaliya u wakiishay in ay soo saaraan Xeerka abka Ciqaabta Soomaaliya;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la magacaabo Guddiga soo darsa kana soo shaqeeya mashruuca ku saabsan Xeerka la soo sheegay;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Waxaa la dhisay Guddii soo darsa soona diyaariya Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliya oo ka kooban:

| | |
|---|---|
| Guddoomiye: | Xildhibaan Xaaji Muuse Boqor |
| Xubin: | Xildhibaan Cabdi Sh. Aadan Cabdulle |
| Xubin: | Xildhibaan Xaaji Axmed Aadan Xaaji Amiin |
| “ | Xildhibaan Cusman Xaaji Maxamed Afrax |
| “ | Xildhibaan Saciid Maxamed Saalim |
| “ | Xildhibaan Xaaji Cabduraxmaan Maxamed Xersi |
| “ | Xildhibaan Nuur Maxamed Xuseen |
| “ | Xildhibaan Axmed Faadil Haashim |
| “ | Xildhibaan Rizzetto Dr. Fulvio |
| “ | Khabiir Zuccardi Merli Dr. Antonio |
| “ | Khabiir Xasan Nuur Cilmi |
| “ | Khabiir Sh. Cabdalle Maxamuud |
| “ | Qaalli Sh. Xuseen Xaaji Abubakar |
| “ | Xoghaye: Tucci Dr. Mano |

**Qod. 2**

Guddigaan sharciyan waxaa xubin ka noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama garsoore uu isagu soo magacaabo.

**Qod. 3**

Guddiga saldhiggiisu wuxuu noqonayaa Garyaqaanka Guud kaasoo loo xilsaaray in uu hawlaha guddiyada kale.

**Qod. 4**

Qoraal doodeedka (maxdarka) waxaa fadhi kasta ka samaynaya xoghayaha kaaso lagu soo darayo warbixinta kama dambaysta ah.

**Qod. 5**

Xubnaha guddiga waxaa u sugnaatay dhaqaale ay ku qaadanayaan ka soo qaybgalka fadhiyada sida ku cad qod. 2 ee Dekereetada 10 Setembar 1956, lamba. 94.

Kharashka arrinta la xariira wuxuu saaranyahay Cutubka 76 – ee hawlgal miisaaniyadeedka.

Muqdisho, 15 Maarso 1957.

Maamulaha

**P. Franco**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Waa la Hubiyay lana Diiwaangaliyay – Diw. Lamba. 2, bogga lamba. 111.

Muqdisho, 30 Maarso 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**